| Kulanka Wadatashiga ee Ugu Horeeya | | | |
|---|---|---|---|
| DHAQAN GALAYA 7/01/2021 | | KHIDMADAHA* | DEBAAJIGA UGU HOREEYA* |
| QORSHAYNTA PDS | | | $2,741*** |
| BIYAHA ROOBKA | | | |
| DEH | TAANGIGA/CEELKA | $266** | |
| | BULAACADA | $266** | |
| DIB U EEGISTA TAHANKA PDS | | | |
| KHARASHKA SHARCI JEBINTA *(kuma jiraan wadarta)* | | Waxba | |
| **DEBAAJIGA UGU HOREEYA & WADARTA KHIDMADAHA $2,741 +** | | | |

* Isticmaal Hagaheena Qiimaha Ogolaanshaha Kharashka si aad u qiyaasto qaybta Degmada ee kharashka mashruucaaga.
** Haddii DEH la codsado, fadlan ka qaad kharashka.
*** + $500 oo loogu talagalay wixii takhasus kasta oo dheeri ah oo la codsado
Foomyada waxaa laga heli karaa: http://www.sdcounty.ca.gov/pds/zoning/ZoningNumeric.html, ama linkiyada hoose. Fadlan si taxadar leh u raac dhammaan qoraalada iyo tilmaamaha si aad uga fogaato dib u dhac ku yimaada geedi-socodka.

**Codsiga Kulanka Latashiga Ugu Horeeya si onlayn ahaan ah ugu soo gudbi halkan:**
https://publicservices.sandiegocounty.gov/CitizenAccess/Cap/CapApplyDisclaimer.aspx?CapType=LUEG-PDS/Planning/Pre-Application/Initial%20Consultation&Module=LUEG-PDS

**SHURUUDAHA SOO GUDBINTA ONLAYNKA AH:**

**Shay kasta oo ka hoos ku qoran (iyo dhammaan sheeyada dheeriga ah) waa in la buuxiyaa oo lagu kaydiyaa hal fayl oo sib ah oo la soo geliyaa khadka iyadoo la socota codsiga.**

---- Qorshaha Balootka (fiiri Qoraalka 2).
126 Khirashada Khidmadaha Fayl Gudbinta iyo Debaajiga: **HAL (1)** nuqul (fiiri Qoraalka 1).
346S Codsiga Dheeriga ah: **HAL (1)** nuqul.

**SHURUUDAHA SOO GUDBINTA QOF AHAAN LOO SOO GUDBIYO FAYLASHA:**

**QAYBTA A:**
**Shay kasta oo hoos ku qoran waa in la buuxiyo oo loo keydiyo sidii faylka elektaroonig ahaan oo PDF ah iyadoo lagu keydinayo USB Flash Drive.**
---- Qorshaha Balootka (fiiri Qoraalada 2, 5).
---- Sharaxaadda Mashruuca: (fiiri Qoraalada 2, 5).
325 Codsiga Kulanka Wadatashiga ee Ugu Horeeya: **HAL (1)** nuqul. (eeg Qoraalka 10).
346S Codsiga Dheeriga ah: **HAL (1)** nuqul.

**Qaybta B:**
**Shay kasta oo hoos ku qoran waa in la buuxiyo oo lagu daabaco warqad kadibna loo keydiyo sidii faylka elektaroonig ahaan oo PDF ah iyadoo lagu keydinayo USB Flash Drive.**
---- Qorshooyinka Balootka: **SHAN (5)** nuqulO (fiiri Qoraalka 4);
126 Khirashada Khidmadaha Fayl Gudbinta iyo Debaajiga: **HAL (1)** nuqul (fiiri Qoraalada 1 iyo 10).
320 Caddeynta Baarselka Sharciga ah (iyo wixiin warqad hantiyeed ah): **HAL (1)** nuqul.
346 Codsiga Oggolaanshaha Go'aan Gaarista: **HAL (1)** nuqul (fiiri Qoraalka 1).

**QEYBTA C:**
**Dhammaan qodobada hoose waxaa loogu talagalay inaad u ogaato macluumaad ahaan. Fadlan ha keenin sheeyadaan.**

090 Xogta Qorshaha Balootka ee Ugu Yar
209 Su'aalaha Inta Badan La Iska Weydiiyo Heshiiska Difaaca
906 Shuruudaha Saxiixa

**QORAALADA:**

1. **MUHIIM AH:**
   Mulkiilaha Guriga ee diwaangashan waa **INUU GUDBIYAA** **Warqad saxeexan oo ogolaansho ah** oo loogu talagalay wakiilka haddii; Wakiil idman uu saxiixo foomka PDS-346 uusana ahayn milkiilaha diiwaangashan ee baarselka.
   Ama, baarselka ay iska leeyihiin labo ama in ka badan oo milkiileyaal diiwaangashan ah.
   Ama, dhammaan milkiilayaasha diiwaangashan aanan saxiixayn foomka PDS-346.
   Ama, Wakiilka Idman uusan ahayn Qollada Maaliyadeed ee Mas'uulka ah.
   Ama, baarselka ay iska leedahay Shirkad.
   **INTAAS WAXAA DHEER:**
   Qofka Dhaqaale ahaan Mas'uulka ka ah **WAA INUU SAXIIXO** foomka PDS-126.
   Qofka Dhaqaale Ahaan Masuul ka ah **MACLUUMAADKIISA WAA INAY ISKU MID KU AHAADAAN** foomka PDS-126 Wakiilka La Igmaday **wuxuu saxiixi karaa** foomka PDS-346 **KELIYA HADDII LAGU SOO LIFAAQO** **Warqadda Oggolaanshaha ee Saxiixan**.

2. Keydso Daraasad kasta, Warbixin kasta, Qorshaha Baltoot Kasta, Khariidad, iwm. oo dhammaystiran, sidii fayl PDF oo elegtarooniga ahaan ah adigoo ku keydinaya HAL (1) USB Flash Drive. Waxaad soo dhiibtaa oo keliya HAL (1) USB Flash Drive. Soo gudbi kaliya faylasha la codsaday. Faylasha WAA INAYSAN lahaan wax xannibaado ammaan ah ama baaswaadh ah. Fadlan fayl kasta oo PDF ah magac ugu yeel USB Flash Drive adigoo ku salaynaya "Cinwaanka ama Nooca" dukumeentiga la soo gudbinaayo (tusaale: Qorshaha Baltooka, Daraasadda Ilaalinta Kheyraadka, Qorshaha Darajaynta). Fadlan ogow: USB Flash Drive lama soo celin doono.

3. Ujeedada Kulanka Wayn ee Kahoreeya Codsiga waa in la aqoonsado cillada naqshada xilli hore ee geedi-socodka bedelna uma ahan baaxada mashruuca oo faahfaahsan ee dhaca xilliga soo gudbinta codsiga.

4. Fadlan soo gudbi agabyada dheeriga ah (ugu yaraan SHAN (5) nuqul oo ah qorshe kasta oo fikradeed), sida qorshayaasha balootka, khariidado, qorshayaasha dabaqa, qiimaynta iyo samaynta sare u qaadida lagama maarmaanka ah xilliga Shirka Weyn ee Codsiga Ka Horeeya. Qorshayaasha waa in la isku dhejiyaa oo la isku laabaa 8½" x 11" iyadoo geesta midig ee hoose ay bannaan tahay.

5. Ogolaanshaha isticmaalka la soo jeediyay - soo gudbi sharaxaad faahfaahsan oo mashruuca ah (saacadaha shaqada, noocyada hawlaha, nooca qalabka, tirada isticmaalayaasha, iwm.) oo ay la socdaan SHAN (5) nuqul oo ah qorshayaasha dhulalka fikradeed ee si qof ahaaneed loo soo gudbiyo. Soo gudbinta onlaynka ah waxay u baahan doontaa fayl dhijitaal ah iyo sharaxaad in la geliyo.

6. Codsadayaasha Wax ka Beddelka Qorshaha Guud waa in ay bixiyaan qiraal qoraal ah oo ku saabsan go'aankooda ah in ay ka gudbaan wax ka beddelka Qorshaha Guud - Kulanka La-tashiga Bilowga ah, haddii ay khuseyso.

7. Haddii mashruucu xadgudub yahay, qorshuhu waa inuu lahaadaa shaambada Sarkaalka u Hoggaansanaanta Xeerka ka hor intaan la aqbalin codsiga.

8. Kulanka Weyn ee Codsiga Kahoreeya ee Mashruuca waa WAAJIB (marka laga reebo haddii si rasmi ah looga tanaasulo) mashaariicda soo socota:

   | | |
   |---|---|
   | Qorshaha Guud / Wax ka beddelka Qorshaha Guud | Qorshaha Dib u soo Celinta |
   | Ogolaanshaha Isticmaalka Weyn / Wax ka beddelka (marka laga reebo goobaha selka ah) | Waxka bedelka Qorshaha Gaarka ah/Qorshe Gaar ah |
   | Dib u aagayn | Khariidadda Qabyada Ah |

9. Xirmada codsigaaga waa inay ahaataa mid dhamaystiran marka aad u keenayso gudbinta. Hannaanka gudbinta ayaa bilaabmaya miiska weyn ee "Hubinta/Iska Xaadirinta" ee dabaqa koowaad ee loogu talagalay gudbinada qof ahaan loo gudbiyo.

10. Shaygan ayaa loo baahan yahay kaliya haddii gudbintu ay tahay mid qof ahaan loo gudbiyo. Codsiga gudbinta ee onlaynka ah waa la aqbali doonaa beddelka foomka lagu dabaqi karo.

11. **Goobta iyo Saacadaha Shaqada Xafiiska:**
    5510 Overland Avenue, Suite 110 (First Floor), San Diego, CA 92123.
    Isniin-Jimco: 8:00 a.m. ilaa 11:45 a.m. iyo 12:30 p.m. ilaa 4:00 p.m. (Marka Laga Reebo Fasaxyada Degmada).

12. Haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan codsiga, fadlan noogu soo dir iimayl:
    PDSZoningPermitCounter@sdcounty.ca.gov